



Fariin Ka Socota Guddoomiyaha Waxbarashada Guerrero

Diisember 18, 2020

Qoysaska iyo Asxaabta Qaaliga ee PPS,

Waxaan u rajeyneyaa idinka, ardaydiina iyo intii idinka ag dhowba inaad heshaan fursad aad ku soo celineyaa qosolkii inta lagu jiro fasaxa xilliga jiilaalka. Dhammaanteen sanadka 2020 wuxuu inoo ahaa sanad caqab wata, haddii ay noqoto shaqsi ahaan iyo bulshadaba.

Waxaan halkan uga mahadcelinayaa barayaasheena, la-taliyaasheena, shaqaalaheena bulshada, maamulayaasheena, xoghayaasheena, wadayaasheena basaska, nadiifiyaasheena, iyo asxaabteena faraha badan oo ay ka mid yihiin mutawiciinta iyo bulshooyinka aan iskaashiga leenahay sidii ay u dadaaleen intii aan ku jirnay waqtigan aan hore loo arag sidii ay u taageeri lahaayeen caruurta, da' yarta iyo qoysaska Dugsiyada Dadweynaha Portland (PPS).

Mar kale waxaan qoysaskeena uga mahadcelinayaa dulqaadkoodii iyo fahamkoodii iyada oo aan sidii wadi doono maareynta caqabadaha horteenaa yaala. Waxa aan aad ugu faraxsanahay taageerada iyo dhiirgalinta aad maalin walba siisaan caruurtiina.

Meel kasta oo bulshadeena ka mid ah waxaa jira tusaalayaal adkaysi u leh dhib kasta oo soo marta ay u adkeysanayaan. Waxa aan idinku martiqaadayaa inaad dhageystaan [hees gaar ah](#), heestaasi oo ay duubeen ardayda wax ka barata Dugsiga Sarre ee Cleveland. Waxa ay idin xasuusin muhiimada ay leedahay naxariista iyo daryeelka uu qofba qofka kale u fidiyo inta lagu jiro waqtiga adag.

Anigoo idiin mahadnaqaya, qabana yididiilo fiican sidoo kalena aad u rajo weyn, waxaan rajeynayaa inaan arko sida ugu degdeg badan ardeydeenii iyo macallimiintii.

Waxaan idinka iyo qoyskiina u rajeynayaa ciid farxad leh, mid nabadgelyo leh iyo cimilo diiran.

Guadalupe Guerrero
Guddoomiyaha Waxbarashada PPS (Superintendent)